



01/11/2021.

HABRAACA SOO GUDBINTA DACWOYINKA DOORASHADA GOLAHA SHACABKA BAARLAMAANKA 11AAD EE JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Guddiga Xallinta Khilaafaaadka Doorashada Dadban (GXKHDD) ee 2020/2021, asagoo fulinaya Heshiiskii 17-ka Septembar 2020, Habraacii 1-da October ee lagu dhisay Guddiga Xallinta Khilaafaaadka Doorashada Dadban 2020/2021, Heshiiskii 27 May 2021 iyo War-murtiyeedkii Shirka Golaha Wadatashiga Qaran ee soo baxay 21-22 Agoosto 2021, wuxuu mas'uul ka yahay u garnaqida iyo xallinta cabashooyinka ay u soo gudbiyaan ergooyinka iyo musharixiinta ay si toos ah u saameeyso xadgudubyada ka dhasha maamulka doorashada dadban 2020-2021. Wuxuu kaloo awood sharci ah u leeyahay inuu eego oo go'aamiyo muranada lagu diido go'aanada ay gaareen guddiyada labada heer ee ku aadan kala shaandheynta ergooyinka iyo murashaxiinta u tartamaya Golaha Shacabka Baarlamaanka 11-aad ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Guddiga Xallinta Khilaafaaadka Doorashada Dadban wuxuu la wadaagayaa Musharaxiinta, Codbixiyayaasha iyo dhamaan Daneeyayaasha Doorashada Dadban 2020/2021 Habraaca soo gudbinta cabashooyinka Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

❖ Cidda Dacwo U Soo Gudbin Karta GXKHDD;

- Waxaa dacwo u soo gudbisan kara Guddiga Xallinta Khilaafaaadka Doorashada Dadban Ergooyinka, Musharaxiinta, oo ay si toos ah u saameeyso xadgudubyada ka dhasha maamulka doorashada.
- Waxaa kale oo dacwo soo gudbisan kara wakiilada dhaqanka iyo xubnaha bulshada rayidka ah ee loo aqoonsadey in ay ka mid yihiin Guddiga soo xulista ergada.

❖ Shuruudaha Looga Baahan Yahay Soo Dacwoodaha;

- Waa in uu ka mid yahay xubnaha xaqa u leh in ay soo dacwoon karaan ee kor ku xusan.
- Waa in uu soo gudbisto codsiga dacwada oo qoraal ah, kuna soo lifaaqo galka cabashadiisa/deeda waraaqda rasiidka bixinta lacagta diiwaangalinta dacwada oo dhan \$3,000 (sadex kun oo doolar), kuna soo shubaa xisaabta bangiga (Account Number) loo asteeyay ee hoos ku xusan .
- Waa in uu soo buuxiyo foomka diiwaan galinta dacwada Doorashada ee Guddiga Xallinta Khilaafaaadka Doorashada Dadban (GXKHDD) ee 2020-2021.

❖ Muddada Soo Gudbinta Dacwooyinka;

- Cabashooyinka la xiriira Guddiga soo xulista ergada (odayaasha dhaqanka iyo bulshada rayidka) waxaa lagu gudbinayaa 3-maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa marka la shaaciyo liiskooda.
- Cabashooyinka la xiriira diiwaangalinta ergooyinka, hab qaybsiga iyo kala shaandheynta ergooyinka waxaa lagu soo gudbinaya 3-maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa marka la shaaciyo liiska ergada kursi kasta.
- Cabashooyionka la xiriira diiwaangalinta musharixiinta iyo ku dhawaaqida liiska musharixiinta waxaa la soo gudbinayaa marka la shaaciyo liiska musharixiinta kursi kasta oo ah ka hor 48 saac xiliga doorashada kursigaas.

- Marka la qabto doorashada kursi kasta waxaa lagu gudbinayaa cabashooyinka la xiriira natiijada doorashada kursigaas 3-maalmood gudahood oo ka bilaabaynaysa marka lagu dhawaaqo natiijada horudhaca ah ee kurkigaas.

❖ **Xafiiska Lagu Soo Hagaajinayo Dacwooyinka:**

- Dacwooduhu waxuu cabashadiisa ku soo hagaajinayaa xafiiska Guddiga xallinta khilaafaadka ee degaan doorashadda kursiga cabashadu ka jirto.

❖ **Muddada baaritaanka iyo Go'aan Ka Gaarista Dacwada:**

- Guddigu waxa uu ku dhameystirayaa go'aaminta cabashado kasta oo rasmi ah muddo todoba (7) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanaysa maalinta cabashada loo soo gudbiyey si dhameystiran.
- Guddigu wuxuu go'aannada cabashada ugu gudbinayaa soo dacwoodaha muddo 24 saacadood gudahood ah marka go'aanka la gaaro.
- Sido kale Guddiga Xallinta Khilaafaaadka Doorashada Dadban (GXKHDD) ee 2020-2021 waxuu go'aanada lawadaagayaa Golaha Wadatashiga Qaranka, Guddiga Maamulka Doorashooyinka Heer Dawlad Goboleed (SEIT), iyo Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka Heer Federal (FEIT), iyo dhamaan Daneeyayaasha Doorashada Dadban ee 2020-2021.

Wabilaahi Tawfiiq





REF: XXG/155/2021

Date: 18/07/2021

Ku: Xoghayaha Joggada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

Muqdisho

Og: Hantidhawrka Guud ee Qaranka

Muqdisho

Og: Wasaaradda Maaliyadda

Muqdisho

Ujeedo: Xisaabaadka Guddiga Doorashooyinka

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa xisaabaadka Guddiga Doorashooyinka ee kaga furan Bangiyada gaar ka ah: **(Private Banks)** sida shaxda hoos ku xusan:

No.	Magaca Bangiga	Magaca Xisaabta	Xisaab Numbarka
1	Salaam Bank	Howlaha Doorashooyinka	34053499
2	Dahabshiil Bank	Howlaha Doorashooyinka	104113673

Sidaas daraadeed waxaa idinka rajaynaynaa inaad sidaas u la socotaan

Wada Shaqeyn wacan

Fatuma Osman Farah

Xisaabiyaha Guud Ee Dowladda.

